

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال



SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA
(GOBOW INDUSTRIES LIMITED)



MUQDISHO-SOOMAALIYA

2023

UJEEDO:- DHISID SHARCI SHIRKADDA GOBOW INDUSTRIES LIMITED.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **05/12/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed “Max’ed Notaayo”**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Wuxuu Mudanaha Soomaaliyeed ee hoos ku Xusan iga Codsaday in aan u Qoro Warqada Dhisida Sharci Waana Sidatan:-

.1-**ABDULKADIR MOHAMOUD GOBOW**, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Warqada Sugnaan No.523128, Ahna Milkiilaha Shirkadda.

Mudanahaan kor ku xusan asaga oo caafimaad qaba, caqligiisuna taam yahay, cid heshiisnaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, wuxuu i weeydistay in aan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed, Waana Sidatan qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD

**MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA
MAGACA SHIRKADDA WAA:- GOBOW INDUSTRIES LIMITED.**



QODOBKA 2-AAD

MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA

Mudada Shirkaddu ay jirayso waa muddo 100 sano ah oo laga bilaabo malinta qoralkaan la canshuuro, hase yeeshee mudadaas waa la kordhin karaa waana la baabi'in karaa waa haddii loo baahdo.

QODOBKA 3-AAD

RA'SUMAALKA SHIRKADDA

- Raa'sumaalka Shirkadda waa **\$65,000** (Lixdan iyo Shan kun oo dolarka Marekanka) Waxaana ku talagalka Shirkaddu yahay in Raa'sumaalka shirkadda waa la kordhin karaa ayada oo loo marayo in sheerer loo furo maal gashadayaasha Cusub.

MAGACA	LACGTA	BOQOLEY
ABDULKADIR MOHAMOUD GOBOW	\$65,000	100%
GUUD:-	\$65,000	100%

QODOBKA 4-AAD
UJEEEDADA SHIRKADDA

- Ka Ganacsiga Wax yaalaha La Isku Qurxiyo (Cosmetics)
- Ka Ganacsiga Wax yaalaha Nadaafada Loo Isticmaalo (Detergents)
- Gudashada Howl kasta oo la xiriirta maalgelinta dalka.
- Abuuridda dakhli Cusub oo wax looga qabanayo shaqa la'aanta dalka ku baahsan
- Fulinta Mashaaricda Maalgelinta la xiriirta iyo hormarinta dalka
- Keenida Farsamo Cusub oo ku haboon duruufaha dalka.

QODOBKA 5-AAD

WAQTIGA LA AASAASAY SHIRKADDA & XARUNTA SHIRKADDA

Shirkada Waxaa La'aasaasay 05/12/2023 Waxaana Lugu As aasay Shirkadda Magaalada Muqdisho waxayna xafiisyo iyo laamo ku yeelan kartaa dhammaan dalka gudihisa iyo dibaddiisaba.

QODOBKA 6-AAD

XISAABTA SOCOTA EE SHIRKADDA

Waxaa xisaabta socota ee shirkadda la xirayaa bisha Sako ee sanad walba.

QODOBKA 7-AAD

FAA'IIDADA IYO QASAARAHA SHIRKADDA

Faa'iidada ama qasaaraha shirkadda waxaa loo qeybsanayaa qeybo isla'eg oo la xiriira qofku saamiga uu ku leeyahay shirkadda.

QODOBKA 8-AAD

MALKIILAHA SHIRKADA

Gudoomiyaha Shirkadda iyo Milkiilaha Waa **ABDULKADIR MOHAMOUD GOBOW** Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Shirkadda iyo kutasarufka hantida shirkada, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo, Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Shirkada Rahana Gelin Karo Hantida Shirkada , Kana Saari Karo Una Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Shirkada Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynba Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkada .

QODOBKA 9-AAD

TIRADA DADKA AA'SAASAHA SHIRKADDA

- Shirkadda waxaa aa'saasay 1, qof ee sare ku xusan.
- Maamulka sare ee shirkadda (board of directors), waxaa uu ka kooban yahay 1,xubin oo ah milkiilaha, waana hay'adda ugu sareysa shirkadda, asaga ayaana dooranaya xubnaha fulinta (executive officers) ee wadaya howl maalmeedka shirkadda.
- Xeer hoosaadka shirkadda ayaa lagu cadeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya xeer hoosadyada aa saasaha shirkadda, Waxa ayna xeerhoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka guud ee shirkadda.

QODOBKA 10-AAD
FADHIYADA HOW-WADEENNADA SHIRKADDA

Fadhiga How-wadeenada shirkadda waxaa isugu yeeri karaa Guddoomiyaha shirkadda iyo ciddii kale ee uu u idmado waana in lugu war galiyaa xubnaha shirkadda 07 cisho ka hor meesha shirku ka dhacayo loona sii cayimo oo loo sii sheego.

QODOBKA 11-AAD
CODKA SAAMILEEYDA

Codka saamileyda shirkadda waxaa loo raacayaa laguna qaadanayaa hal-dheeri haddii ay isla ekaadaan oo ay is garab dhacaan xubnaha shirkadda ee wax dooranaya waxaa loo raacayaa dhinaca guddoomiyuhu la jiro taas oo noqoneysa aqlabiyadda saxda ah.

QODOBKA 12-AAD
ISTICMAALIDDA ASTAANTA SHIRKADDA

Astaanta Guud ee Shirkadda waa Astaanta kor ku dheggan wixii aan loo isticmaalin waxaa loo arkayaa inaysan ka tarjumeyn shirkadda.

QODOBKA 13-AAD
XUBINTII GEERIYOOTA

Xubinta geeriyoota oo ka mid ah hantilayaasha shirkadda waxaa saamigiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah, oo ay soo caddeyso maxkamad, kadib waxay soo magacaabanayaan wakiil haddii ay ogolaadaan in shirkadda ay kasii mid ahaadaan, sidoo kale haddii ay dalbadaan in saamigooda la baxaan sanadka xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.

QODOBKA 14-AAD
KA BIXITAANKA SHIRKADDA

- 1-Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamileyda shirkadda.
- 2-Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda.
- 3-Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca shirkadda.
- 4-Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.

QODOBKA 15
HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY
15 QODOB 1 COVER , 5 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.

SAXIIXA MILKIILAHA SHIRKADDA ABDULKADIR MOHAMOUD GOBOW,

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP.901/T.P.N/23, Tr. 05/12/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixa Kor Ku Xusan in uu yahay Saxiixii Runta ahaa **ABDULKADIR MOHAMOUD GOBOW (Ahna Milkiilaha Shirkadda)** waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana uu saxiixay Milkiilaha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay Magaciisa in uu yahay kii dhabta ahaa ee lahaa saxiixa kor ku xusan iyadoo Cuskanaysa Dukumintiga Ka Soo Baxay D/hoose ee Xamar, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"





DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
WARQADDA SUGNAANTA
Certificate of Identity Confirmation

DUQA MAGAALADA MUQDISHO WUXUU CADEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QOFKA HOOS KU XUSAN:

(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details:)

MAGACA Full Name	ABDULKADIR MOHAMOUD GOBOW
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	01-Feb-1967
GOOBTA DHALASHADA Place of Birth	MOGADISHU
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA ID number	523128
JINSI Gender	Male
XAALADDA GUURKA Marital Status	Married
DEGGAN Address	Warta-nabada
MAGACA HOOYADA Mother's full Name	AMINA AHMED BARISE
TAARIKHDA LA BIXIYAY Date of Issue	2-Dec-2023
SHAQADA Occupation	GANACSADE



Right Thumb Print



Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu
Yuusuf Xuseen Jimcaale





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA SAMEYN SHIRKADD

REP.901/2023.

Tr,23/12/2023

Magaca qaadaha: →

Abas Ahmed Abtidon

Meeshuu deganyahay →

Hodan District

Telfoonkiisa: →

0612089399

SAXIIXA BIXIYAHA:

SAXIIXA QAADAHA: